# GUUDMAR

Soomaaliya waa qaran xaalad burbur ah ku sugan oo uu halakeeyey mid ka mid ah dagaalladii sokeeye ee dunida ugu foosha xumaa ee dhaca sanadihii dhowaa. Dagaallo baahay oo dhiig badanina ku daatey ayaa sii holcay labadii sano ee u dambaysay kuwaasoo burbur iyo halaag u gaystey dalka iyo dadkiisiiba caasimadii Muqdishona ka dhigey wax aan jirin oo burburtey. Ciidanka Itoobiya, kuwa Dawladda KMG ah iyo xoogagga Kacdoonka intuba waxay jebiyeen oo ku xadgudbeen xeerarka dagaalka iyagoon weliba ka baqayn in lala xisaabtamo, waxayna ku qasbeen dadkii caadiga ahaa ee Soomaliyeed inay dusha u ritaan xanuunka dagaalka hubaysan ee ay ku jiraan.

Tan iyo 1991-kii dhicistii dawladdii Dhexe ee ugu dambaysey, Soomaaliya waxay ahayd dal lagu yaqaanney meel ay ka jiraan qalalaase iyo dagaallo joogto ah. Markii ay Ciidamada Itoobiya dalka faragelinta ku sameeyeen dabayaaqadii 2006-da, waxa horeba markaa dalka ka muuqday daqarradii 16 sano oo ay dawlad la'aan iyo dagaallo hareeyeen.

Laakiin labadii sano ee ugu dambeeyey ma ahayn oo keliya qayb kale oo ka mid ah mashaakilaadkii hore loogu yiqiin taariikhda colaadda Soomaaliya. Masiibooyinka xuquuqda aadanaha iyo kuwa bani'aadannimo ee Soomaaliya maanta haystaa oo xaddigooda iyo heerka ay ku socdaanba aan la arkin tan iyo horraantii 90-meeyadii waa kuwo looga cabsi qabo inay galaafato nolosha iyo nolol maalmeedka malaayiin qof oo Soomaali ah.

Bishii Disembar sanadkii 2006-da Ciidanka Milateriga Itoobiya ayaa farageliyey Soomaaliya si ay dagaal ula galaan Midawga Maxkamadaha Islaamka, iyaga oo ka jawaabaya casuumaadda dawladda Federaalka KMG ah oo caalamku aqoonsan yahay, balse ah mid gabi ahaanba aan waxqabad lahayn.  Midowga Maxkamaduhu

(ICU) waa isbahaysi ay ku jiraan Maxkamadaha Shareecada (Shareecada Islaamka) oo magaalada Muqdisho qabsadey bishii Juun 2006-da kadib markii ay cayriyeen tiro dagaal-oogayaal ah oo gacanta ku hayey inta badan magaalada. Xilligaasi Maxkamaduhu waxa ay billaabeen wax u muuqdey inay yihiin awood si lama filaan ah ku soo baxdey, oo ku baahdey inta badan Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya. Laakiin Itoobiya waxay isbedelkaas u aragtey digniin cabsi leh; Xubno muhiim ahaa oo Midowga Maxkamadaha (ICU) lug ku lahaa ayaa si cad dagaal ugu hanjabay Itoobiya waxayna ka hadleen inay gelayaan gebi ahaanba Gobolka Bari ee Itoobiya ee Soomalidu degto.

TFG-da oo saaxiib la ahayd Itoobiya waxay ahayd fadhiidnimo iyo musuqmaasuq isku biirsadeen, waxayna soo dhoweysey taageeradii millateri ee Itoobiya. Sannadkii 2006-da waxay Ciidamadeedu si muuqata u joogeen laba magaalo oo kaliya, mana aysan jirin adeegyo la taaban karo oo ay u qaban jirtey Soomaalida, soo bixiddii Maxkamaduhuna wuxuu Itoobiyaanka ka sii dhigey wax aan waxba ku fadhiyin. Dawladda Mareykanka, oo ku cambaareysey Hoggaamiyayaasha Maxkamadaha inay magangelyo siinayaan argagixiso la doon-doonayo, waxay ku taageeertey tallaabadii Itoobiyaanka taageero siyaasadeed iyo kaalmo milateri.

Milaterigii Itoobiya si fudud ayuu uga takhalusay maliishiyadii Maxkamadaha (ICU). Maalmo yar gudahoodna waxay u muuqatey inay si sahlan u guulaysteen TFG-duna waxay guushaas uga faa'iideysatay inay awooddii Muqdishu kula wareegaan. Laakiin weerarradii ugu horreeyey ee mucaarad taas lagu diidan yahay ee lagu qaadayey Itoobiyaanka iyo TFG-da  isla markiiba hore ayey ka billowdeen si dhaqsi ah ayeyna u noqdeen dagaal daba dheeraadey oo illaa markaas sii weynaanayey siina xumaanayey bil kasta ee dhamaataba. Xoogagga mucaaradka ayaa iskugu yimid oo ku bahoobey hal urur oo wayn oo ay ku wada jiraan Hoggaamiyaashii Maxkamadaha (ICU), Xildhibaannadii hore ee Baarlamaanka iyo qaar kale waxayna la baxeen Isbahaysiga Dib u Xoreynta, waxaa kale oo mucaaradka qayb ka ahaa kooxda xag-jirka ah ee Al-Shabaab iyo dhowr kale oo kooxo hubaysan ah oo iskood u madaxbannaan.

Labadii sano ee ina dhaaftey nolosha magaalada Muqdisho waxay ku jirtey xaalad argagax leh oo si joogto ah maalin kasta ay ciidamada Itoobiyaanka ah, TFG-da iyo

xoogaga muqaawamadu ay isaga hor imanayeen dagaallo magaalada gudaheeda ah ayna isugu jawaabayeen daryaanka madaafiicda iyagoon wax tixgelin ah siinayn nolosha boqollaal kun oo rayid ah oo magaalada ku go'doomay. Duqeynta inteeda badani waxay ahayd mid aan loo aabo yeeleyn oon kala sooc lahayn oo lala beegsanayey xaafadaha aadka loogu badan yahay iyadoon si waafi ahna la isugu dayayn wax dadaal ah oo madaafiicdaas lagu hagayo si ay u gaaraan halkii bartilmaameedkoodu ahaa oo loola dan lahaa. Mucaaradku hoobiyeyaal ayey ka soo ridaan xaafadaha dadku ku badan yahay kuwaasi oo ku dhaca isagana gudba saqafyada guryaha rayidka ee ku ag yaalla saldhigayada ciidanka boliiska iyo fariisimaha Itoobiyaanka. Ciidamada Itoobiyanka iyo kuwa TFG-du waxay ku soo jawaabaan si aan kala joogsi lahayn Gantaallo isugu jira Madaafiicda goobta, Hoobiyayaal iyo gantaalo kale oo burburiya guryaha iyo dadka ku noolba ee ku ag yaalla halkii ay wax ka soo tuureen mucaaradka oo isla markiiba goobta ka baxsada. Dagaalku si joogto ayuu uga dhex qarxaa xoogagga mucaaradka iyo Itoobiyaanka amaba kuwa dawladda, inta badanna rayidka ayuu dagaalkaasi qabsadaa oo dhexda u gala rasaasta la is dhaafsanayo.

Dhinacyada ku dagaallamaya Soomaaliya waxay mas'uul ka yihiin tiro aad u badan oo xadgudubyo halis ah oo ka dhan ah xuquuqda aadanaha. Ciidanka Nabadgelyada ee TFG-da iyo maliishiyooyin ayaa argagixin kula kacay dadka rayidka ah kadib markii ay u gaysteen dilal, kufsi, weerarro iyo bililiqo. Ciidamada mucaaradka waxa ay handadaad dil ah iyo dilal khaarijin ahba kula kaceen dadka ay u arkaan inay iyaga wax ka sheegaan iyo ciddii la shaqeysa TFG-daba oo ay ku jiraan kuwa hawlo nadaafadeed ka sameeya xafiisyada dawladda ama biyo ka iibiya ciidamada Itoobiyaanka. Anshaxa Ciidamada Itoobiyaanku waxaa uu gaarey heer hooseeya oo ay mas'uul ka yihiin falal dembiilenimo halis ah oo sii badanaya. Dhibanayaashu ma helaan hab ay dacwadahooda ku diiwaangeliyaan – Ciidanka boliiska ee dawladda TFG-da waxaa qudihiisa lagu heley inuu gaystey in badan oo ka mid ah xadgudubyadii ugu xumaa ee dhacay, kuwaasi oo ay ku jiraan in ay iska qabqabtaan oo ay xiraan dadka caadiga ah ee rayidka ah si qoysaskooda looga qaato lacago madax furasho ah.

Laba sano oo uu socdey dagaal faraha ka baxay oon xuduud celisa lahayn iyo ku xadgudbid xuquuqda aadanaha ah ayaa gacansiiyey inay abuuranto qalalaase

xaalad bani'aadannimo oo sii xumaanaysa, iyadoona aysan jirin dadaal ku filan oo looga jawaabayo arrintaa. Tan iyo bishii Janaayo 2007 ugu yaraan 870, 000 oo rayid ah ayaa ka qaxay Muqdisho oo kaliya rabshadihii ka jirey – waxayna u dhigantaa saddex marka loo dhigo laba ka mid ah dadkii magaalada deganaa. Deegaannada Koonfurta iyo Badhtamaha Soomaaliya 1.1 Malyuun oo Soomaali ah ayaa guryahoodii ka bara kacay. Boqollaal kun  oo dad barakacay ah ayaa ku nool guryo cooshado  ka samaysan oo ku dhexyaall xeryo qaxooti oo ku yaalla wadada isku xirta Muqdisho iyo Afgooye, kuwaasi oo iyaga qudhoodu noqdey dad si cadawnimo ah loogu dul dagaallamo.

Kumannaan qaxooti Soomaaliyeed ah ayaa bil kasta ku qulqulaya xuduudaha dalka iyagoo ka cararaya dagaallada aan kala joogsiga lahayn. Maliishiyaad hubaysan oo aan cidna ka amar qaadan ayaa dhac, dil iyo kufsi u gaysta dadka soo barakacay ee ku safraya waddooyinka Koonfurta ee aada dhinaca Kenya.  Boqollaal Soomaali ah ayaa sanadkan badda ku haftey iyagoo Gacanka  Cadmeed  isku-biimaynaya inay doonyo kaga gudbaan oo ay gaaraan Yemen. Iyadoo khatartaas leh ayaa hadana kumannaan qof ay safarkaas galaan bil kasta. Waxaana ay arrimahaasi abuureen in xerada qaxooti ee Dhadhaab oo ku taalla Waqooyi-Bari Kenya ay hadda tahay xerada qaxooti ee ugu weyn adduunka waxaana ku jira isugeyn dad gaaraya 220,000 oo qof.

Baahida Bani'aadannimo ee Soomaaliya ka jirta aad ayey u fara badan tahay. Hay'adaha gargaarka bani'aadannimo waxa ay qiyaasayaan in dad ka badan 3.25 malyuun oo Soomaali ah – oo u dhiganta 40% dadka soomaaliyeed ee ku nool Koonfurta iyo Badhtamaha Soomaaliya – ay u baahanayaan gargaar deg deg ah dabayaaqada sanadka 2008-da. Laakiin dagaallada, gaar ahaan weerarada lala beegsanayo  shaqaalaha gargaarka, ayaa xannibaya habsami u socodka gargaarkii loo baahnaa. Sanadkan dhamaadey waxaa dhacay mawjado hanjabaado ah iyo dilal qorsheysan oo lala beegsanayey hawlwadeennada bulshada rayidka ah iyo shaqaalaha gargaarka bani'aadannimo ee Soomaaliya. Ugu yaraan 29 qof oo ahaa shaqaalaha gargaarka bani'aadannimo ayaa la diley sanadkan 2008-da iyadoo baqdin in la dilayo ah darteedna ay dalka uga carareen in badan oo ka mid ahaa isla dadkii ay Soomaalidu ugu baahi badnayd xilligan qalalaasaha.

Si kasta oo ay u naxdin badan tahay xogta halkan lagu soo gudbinayo hadana argagaxa ugu weyn ee Soomaaliya ka jira sida kaliya oo si buuxda loogu ogaan karaa waa waayo-aragnimadii ay la kulmeen dadka caadiga ah ee ay nolshoodii ku burburtey. Hay'ada Xuquuqda Aadanaha ee Human Rights Watch waxa ay wareysatey wiil dhallin yaro ah oo weerar qarax bambaano ah ee mucaaradku gaysteen ku dhaawacmey oo weli dhaawiciisii kula dacdarreysan cusbitaal aan awood buuran lahayn oo ku yaalla xeryaha qaxootiga ee Kenya. Qaar kale ayaa arkay ehelladoodii oo ay dishey rasaas habow ah intii uu socdey dagaal arxan la'aaneed oo xabadaha la isu weydaarsanayo si aan kala sooc lahayn. Nin dhallinyaro ah ayaa isaga oo arkaya waalidkiis toogasho lagu diley kadib markii ay murmeen xubno ka tirsan ciidanka Dawladda Federaalka. Gabar uur leh oo dhowr iyo toban jir ah ayaa Human Rights Watch u sheegtey in si koox-ah ay ciidanka Dawladdu u kufsadeen. Wiil kale oo dhallinyaro ah ayaa caro ka tan badisey kadib markii isaga oo arkaya ay hortiisa ciidanka Itoobiyaanku ku kufsadeen walaalihiis iyo hooyadiisba iyagoo sidoo kalena diley aabihiis.

Ma jirto koox ka mid ah Dhinacadii isku hayey Soomaaliya oo sameeyey dadaal la taaban karo oo lagula xisaabtamayo kuwii mas'uulka ka ahaa dembiyada dagaal iyo xadgudubyadii halista ahaa ee xuquuqda aadanaha laga galay. Xaqiiqada laga murugoodo ee isla-xisaabtan la'aanta baahday een la isu raacanayn dembiyada waaweyn waxaa sii biiriyey in TFG-da iyo Mucaaradkuba ay u kala qaybsan yihiin dhowr qaybood oo qayb kastaa ay goonideeda u taagan tahay. Ciidammada nabadgelyada ee dawladda KMG ah si joogto ah mushaharo looma siiyo waxayna inta badan u dhaqmaan sidii maliishiyaad iskood u shaqeysta halkii ay ahaan lahaayeen ciidammo ammni oo anshax leh.

Khilaafka ka taagan Soomaaliya waxa uu leeyahay laba gees oo laga eegi karo mid heer caalami iyo mid gudaha ah. Dalalka gobolka ee Soomaaliya deriska la ah sida Itoobiya, Ereteriya iyo Kenya dagaalku waxa uu u abuurayaa khatar deg-deg ah ee dhinaca ammaanka. Dawladaha gobolka iyo kuwa Reer Galbeedku waxay haatan isku dayayaan inay kaalin firfircoon ka ciyaaraan taageerridda wadahadallada nabadeed ee Jabuuti oo u dhexeeya TFG-da iyo kooxaha Mucaaradka. Hase ahaatee dadaalladaasi wax horumar ah ma samaynin, kooxo muhiim ah oo dagaalka ku jira oo diidey inay ka qayb galaan darteed.

Warbixintani waxay garawsan tahay inaysan jirin “xal-dhaqsi” ah oo Soomaaliya looga dhalin karo dhowrista xuquuqda aadanaha, nabadgelyo iyo xasilooni. Sidaasoo ay tahay hadana tani uma cudurdaarayso inaysan jirin rabitaan siyaasadeed oo wax looga qabanayo mashaakilka Soomaaliya oo ay dhibaatadiisa gacan ku leedahay faragelin caalami oo hore, taas kaliyana ma ahan, oo siyaasadaha awoodo dibedda ah ayaa xaaladda Soomaaliya sii murjinaya. Dalal badan oo arrimaha Soomaaliya muhiim ka ahaa ayaa arrinta Soomaaliya ka ciyaaray kaalin si qoto dheer wax u burburinaysa , waxayna mas'uul ka yihiin sii hurinta khilaafaadka.

Xiriirka sumaysan ee u dhexeeya Itoobiya iyo Ereteriya ayaa si weyn gacan uga geystey mashaakilka Soomaaliya. Ereteriya waxay Soomaaliya ka dhigatey fagaare ku haboon oo si aan toos ahayn ay ugula dagaallami karto ciidamada Itoobiya ee dalka jooga, halka mid ka mid ah sababihii ay Itoobiya u soo faragelisey Soomaaliya ay ahayd cabsi ay ka qabtey Soomaaliya oo Maxkamaduhu hoggaaminayaan ay is bahaysi la yeelato Ereteriya oo ay hoy siiyaan mucaaradka Itoobiya sida Ereteriyaba yeeshey.

Itoobiya dano nabadgelyo oo sharci ah ayey ka leedahay Soomaaliya, laakiin kama aysan soo dhalaalin mas'uuliyadeedii laga filayey ee inay baajiso isla markaana wax ka qabato denbiyo waaweyn oo dagaal oo ay ciidamadeedu dalka ka gaysteen. Dawladda Itoobiya waxay ku guuldarreysatey inay xitaa aqoonsato denbiyadii ciidamadeedu dalka ka gaysteen, iskaba dhaaf baaritaan ay ku samayso oo ay xaqiijiso in lagula xisaabtamo denbiyadii ay geysteene. Tani waxa kaliya oo ay difaac u noqonaysaa isla-xisaabtan la-aanta oo sii dhiirrigelinaysa xadgudubyo dheeraad ah.

Siyaasadda Mareykanka ee ku aaddan Soomaaliya waxaa kaliya oo ay ku wareegaalaysataa cabsida ah in shabakadaha argagaxisada caalamiga ahi ay dalka saldhig ka samaystaan. Dawladda Mareykanku si toos ah ayey u taageertey faragelintii ay Itoobiya ku samaysey Soomaaliya, waxayna taageero siyaasadeed oo xoog leh siisey dawladda KMG ah. Laakin saraakiisha Mareykanku waa ay diideen inay si micno leh u wajahaan ama ay rasmi ahaan u aqoonsadaan inta uu gaarsiisan

yahay xadgudubyada ay milateriga Itoobiya iyo TFG-du dalka ka gaysteen. Mawqifka Mareykanku qaatey kuma guuldarreysanin oo kaliya inuu ka hadlo xuquuqda iyo tacadiyada malaayiin Soomaali ah, balse waa mid aan u danaynay oo ka hor jeedda danaheeda, waxay sii badinaysaa isla xagjirnimadii la doonayey in laga adkaado.

Midowga Yurub iyo dhowr dawladood oo muhiim ah ee dalalka Yurub ayaa sidoo kale ku guuldarrestey inay mashaakilka ka eegaan dhinaca xuquuqda aadanaha, iyadoo saraakiisha badankood ay ka rajo qabeen in taageero aan xadidnayn oo la siiyaa ciidamada xadgudubyada geeysta ee TFG-da ay si uun u wax uga tareyso xasiloonida.

Hadda ayaa la joogaa waqtigii aragti cusub iyo rabitaan cusub oo siyaasadeed laga qaadan lahaa Soomaaliya. Human Rights Watch waxay ugu baaqeysaa dhammaan qaybaha ku lug leh dagaallada ka jira Soomaaliya inay dhameeyaan dembiyada dagaal ee soo noqnoqonaya iyo xadgudubyada ka dhanka ah xuquuqda aadanaha ee dhaawacay tiro aan xisaab lahayn oo Soomaaliyeed waana in la xaqiijiyaa ka xisaabtanka xadgudubyadii hore u dhacay . Tani waxa kaliya oo ay dhaqan gal noqon kartaa haddii si xoog leh ay mabda'ah uga qayb qaataan hirgelintiisa dawladaha muhiimka ah oo hore isaga indha-tirayey xaddiga uu gaarsiisan yihiin xadgudubyada dagaalka la xiriira ee Soomaaliya ka dhacay.

Ku lug-lahaanshaha caalamku waa inuu tixgelin siiyaa xuquuqda iyo baahida dadka Soomaaliyeed. Waa inay ku jirtaa la socosho wanaagsan oo lagu sameeyo xadgudubayadii hore u dhacay iyo kuwa hadda socda iyo, in laga ambaqaado dadaal laga gaysto Golaha Ammaanka ee QM si loo sameeyo guddi madaxbannaan oo xaqiiqo raadin ah oo soo baara dembiyadii waaweynaa ee ka dhacay Soomaaliya. Dawladaha muhiimka ahi waa inay miisaankooda diblomaasiyadeed cadaadis ku saaaraan Itoobiyaanka, TFG-da iyo Mucaaradka iyagoo ku adkaysanaya in lala xisaabtamayo waana  inay dhameeyaan weerarrada joogtada ah ee lagu hayo Muwaadiniinta Soomaaliyeed ee dhibaatadu haysato.

Human Rights Watch waxay waqti xaadirka ugu baaqeysaa dawladda KMG ah inay dhaqsi shaqada uga joojiso saraakiisha lala xiriirinayo inay gaysteen dembiyo waaweyn oo dagaal inta ay ka soo baxayso natiijada baaritaanka guddi

madaxbnannaan. Dawladda Itoobiya waa inay baaritaan buuxa ku samaysaa xadgudubyadii ay gaysteen milaterigeeda ku sugan Soomaaliya, waana inay si dhaqsi ah u joojisaa falalka duqeynta ah ee si aan loo meel dayin ula beegsanayso deegaannada rayidku degan yihiin. Kooxaha mucaaradka ku wada jira waa inay dhaqsi u joojiyaan dilalka qorsheysan ee rayidka, weerarrada aan kala sooca lahayn iyo xannibaadaha lagu hayo gaarsiinta gargaarka bani'aadannimo.

Washington, maamulka cusub ee madaxweynaha Mareykanka Barack Obama waa inuu si dhaqsi ah dib ugu eegaa siyaasadda Mareykanka ee Soomaaliya iyo guud ahaan Geeska Afrikaba, waana inuu bedelaa siyaasadihii guuldarreystey ee madaxweynihii isaga ka horreeyey. Dawladaha Yurub waa inay iyaguna sidaasoo kale ku daydaan, iyagoo ka billaabaya inay ka noqdaan tallaabooyinka waxyeellada leh ee siyaasiyiinta Midowga Yurub ay lacagaha deeqda ah ku siinayaan ciidamada xadgudubyada gaysta ee TFG-da. Golaha Ammaanka ee QM waa inuu dhisaa guddi xaqiiqo raadin ah oo qiimayn ku soo sameeya dembiyada caalamiga ah ee baahsan waana inay u gogol xaaraan sidii loo dhamayn lahaa isla-xisaabtan la'aanta gacan ka gaysatey inay abuuranto xaaladda masiibada ah ee illaa maanta taagan.

## Talobixin

Ma jiro 'xal dhaqsi' ah oo uu leeyahay ama looga bixi karo khilaafaadka cakirmey ee wejiyada badan leh ee Soomaaliya, laakiin dhammaan xubnaha muhiimka ah ee gobolka iyo kuwa caalamkuba kaalin ayay ka qaadan karaan sidii ay suurto gal uga dhigi lahaayeen in la soo afjaro xadgudubyada lagu soo qeexey warbixintan. Iyadoona la tilmaami karo in in badan oo ka mid ah dhinacyadan ay gacan ku lahaayeen sidii ay ku billaabatey xaalada masiibada ah ee ka jirta Soomaaliya. Mas'uuliyada ugu weyn ee sidii oo joojin lahaa xadgudubyadii lagu gaystey dagaalka waxay dusha ka saaran tahay dhinacyada dagaalamaya. Laakiin waxay tani suurto gal noqon kartaa oo kaliya haddii cadaadis xoog leh ay saaraan ayna taageeraan dawladaha dibedda ee muhiimka ah iyo hay'adaha caalamiga ahba.

Xubnaha beesha caalamka metelayaa waa inay marka hore ka waantoobaan siyaasadihii sii xumeeyey ee keeney in musiibada Soomaaliya ay faraha ka baxdo. Waana inay sidoo kale mawqif adag ka qaataan sidii loo dhamayn lahaa isla-xisaabtan la'aanta Soomaaliya ee sii hurisey xadgudubyadii ugu xumaa. Halka ugu habboon ee laga billaabi karaana waa in Golaha Ammaanka ee QM uu dhiso guddi xaqiiqo raadin ah oo dejiya khariiraddii loo raaci lahaa xadgudubyadii dhacay aasaaskana u dhiga in la isla xisaabtamo. Arrimaha mashaakilaadka ka jira Soomaaliya sababay wey badan yihiin weyna kala duwan yihiin. In la fahmo arrimahaas iyo sidii ay ku abuurmeenba waa ahmiyad lagama maarmaan u ah dadaalkasta ee mustaqbalka si loo xaqiijiyo in laga xisaabtamo xadgudubyadii hore u dhacay loogana gaashaanto xadgudubyo iyaga oo kale ah inay mustaqbalka dhacaan. Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobey inuu qaado tallaabo uu ku abuurayo Guddi xaqiiqo raadin ah waxay noqonaysaa farriinta ugu cad ee beesha Caalamku diri karto si loo muujiyo inay dhab ka tahay inay arkaan ka xisaabtanka dembiyadii dagaalka iyo xadgudubyadii xuquuqda aadanaha ee ka dhacay Soomaaliya.

Mustaqbalka na soo aaddan, xubnaha beesha caalamka ee muhiimka ah sida Mareykanka iyo dawladaha Yurub waa inay si qoto dheer dib uga fikiraan

siyaasadahooda aan wanaagsanayn ee ku aadan guud ahaan Geeska Afrika. Arrimahan qotoda dheerna qaybaha dambe ee warbixinta ayaa lagu falanqaynayaa.

## Ku socoto Dawladda Federaalka Ku meelgaarka ah ee Soomaaliya

- Waa inay billowdaa baaritaan madaxbannaan, dhexdhexaad ah oon qarsoodi ahayn oo lagu soo baarayo eedaymaha la xiriira dembiyo waaweyn oo ka dhan ah xuquuqda aadanaha oo ay gaysteen ciidanka nabadgelyada ee dawladda KMG ah. Waa inay si dhaqsi ah hawl-joojin ugu samaysaa Taliyaha Ciidanka Boliiska Cabdi-Qaybdiid iyo madaxa Hay'adda Nabadsugidda Qaranka Maxamed Warsame Darwiish, inta uu ka soo baxayo natiijada baaritaankanka. Waa in lala xisaabtamaa Saraakiisha TFG-da ee lala xiriirinayo xadgudubyada Xilkay doonaan ha lahaadeene.
- Waa inay si dhaqsi ah u soosaartaa amarro cad oo rasmi ah ayna qaaddaa dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka ah si loo xaqiijiyo in ciidamada nabadgelyada ee TFG-da iyo maliishiyaadkuba ay ku dhaqmaan xeerarka xuquuqda aadanaha iyo kuwa bani'aadannimo, oo ay ku jiraan in la joojiyo dilalka aan maxkamadi xukumin, kufsiga, meelkadhacyada loo gaysto rayidka, bililqada iyo dac-darreynta hantidooda. Ciidamada haatan mas'uulka ka ah xadgudubyadaasna waxaa ka mid ah kuwa Hay'adda Nabad Sugidda, Ciidanka Boliiska, Ilaallada madaxtooyada iyo maliishiyaadka ay leeyihiin saraakiisha TFG-da oo uu ku jiro Gduqii hore ee magaalada Muqdishu.
- Waa inay shacabka u fududaysaa inay helaan gargaar bani'aadanimo iyadoo si buuxda u siinaysa hay'adaha gargaarka madaxbannaani ay ku dhaqdhaqaaqaan, waana in la joojiyaa handadaadaha iyo faragelinta lagu samaynayo hawlahooda gargaarka.
- Waa inay joojisaa dhaqan-xumaynta maxaabiista ayna xaqiijisaa in loo ogolaado in qoysaskoodu ay arki karaan ayna helaan xannaano caafimaad oo ku habboon inta ay xiran yihiin. Waa in dhaqsi si rasmi ah farriimahan loogu gudbiyaa dhamaan hay'adaha boliiska iyo kuwa nabad sugidda.
- Waa in si dhaqsi ah loo xiraa xabsiga Hay'adda Nabadsugidda Qaranka (NSA) ee ku yaalla Baarista Xisbiga, halkaasi oo xadgudubyada xabsigaas laga gaystaahi yihiin kuwo loo sameeyo si nidaamsan. Waa in la xukumaa

dhammaan maxaabiista u xiran Hay'adda Nabadsugidda Qaranka ama la sii daayaa. Maxaabiistii la xukumo waa in loo wareejiyaa xabsiyada kale.

- Waa in si dhaqsi ah loo ogolaadaa in si madax bannaan loo kormeero xarumaha wax lagu xiro.
- Waa in lagu casumaa Laanta QM ee Xuquuqda Aadanaha inay kordhiso tirada shaqaalaha ee kormeeraya kana warbixinaya xadgudubyada ka dhanka ah xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya.

## Ku socoto Isbahaysiga Dibu-Xoreynta Soomaaliya

- Waa inuu soo saaraa amarro cad-cad uuna qaadaa dhamaan tallaabooyinka muhiimka ah si loo xaqiijiyo in ciidamada hubaysan ee ka amarqaata Isbahaysiga (ARS) inay dhowraan xeerarka caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha ayna joojiyaan dhammaan xadgudubyada ka dhanka ah bani'aadanimada.
- Waa inay sameeyaan nidaam xaqiijinaya in dhammaan ciidamada Isbahaysiga iyo taliyayaashoodaba lagula xisaabtami karo gefefka xeerarka caalamiga ah ee bani'aadannimada iyo xadgudubyada waaweyn ee xuquuqda adanaha.
- Waa in dhaqsi loogu ogolaadaa kormeerayaal madax bannaan  inay soo arkaan xabsiyada ku yaalla deegaannada uu ka taliyo Isbahaysigu.
- Waa inuu xaqiijiyaa in dhammaaan shacabka u baahani uu galaangal u leeyahay gargaarka bani'aadannimo iyagoo u ogolaanaya hay'adaha gargaarka dhaqdhaqaaq madaxbannaan.

## Ku socoto Al-Shabaab iyo kooxaha kale ee Dagaalamaya

- Waa inay qaadaan dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka ah ee lagu xaqiijinayo dhowrsita xeerka caalamiga ah ee xuquuqda bani'aadannimada oo ay ku jiraan:
    - Joojinta in rayidka “laga dhigto gaashaan” ama la geliyo khatar aan loo baahnayn sida in weerarrada laga soo qaado ama in hoobiyayaal laga soo tuuro deegaannada ay dadku ku badan yihiin;
    - In la soo afjaro weerarrada hoobiyayaasha iyo weerarada kale ee aan loo aabo yeelayn ama lagu kala sooci karin rayidka iyo kuwa dagaalamaya

- Waa in loo fududeeyaa rayidka inay aadaan goobaha nabdoon inta ay socdaan hawlgallada Milateri;
- Waa in la joojiyaa hanjabaadaha dilka ah iyo dilalka qorsheysan ee lala beegsanayo rayidka sida suxufiyiinta, shaqaalaha gargaarka, iyo saraakiisha rayidka ah ee ka tirsan dawladda KMG.

- Waa in si ku habboon loola xisaabtamaa taliyayaasha ciidanka iyo hawlwadeenka gaysta xadgudubyo ka dhan ah xeerarka caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha.
- Waa inay u fududeeyaan rayidka gaaritaanka gargaarka bani'aadannimo, iyagoona hay'adaha gargaarka siinaya dhaqdhaqaaq madaxbannaan, isla markaana joojinaya handadaadda iyo faragelinta lagu samaynayo hawlahooda gargaarka.

## Ku socoto Dawladda Federaalka ah ee Itoobiya

- Waa inay soo saartaa amarro cad-cad oo rasmi ah ayna qaaddaa tallaabo kasta oo lagu xaqiijinayo dhawrista xeerarka caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha sida inay:
  - Joojiso dhammaan weerarrada, gaar ahaan duqeynta ah madaafiicda iyo gantaalaha aan loo meel dayin ee aan lagu kala sooci karin dadka rayidka ah iyo kuwa dagaallamaya amaba marka qasaaraha dadka rayidka ahi uu ka weyn yahay faa'iidooyinka milateri ahaan laga damcsanaa in laga gaaro;
  - In la joojiyo khatar gelinta dadka rayidka ah sida in ciidammo la soo dejiyo deegaannada ay rayidku aad u degan yihiin;
  - In tallaabo laga qaado lagana hor tago xadgudubyada ay gaysanayaan ciidamada TFG-da xilliyada ay wadajirka u wadaan hawlgalada guryo baarista ah. Gaar ahaan, waa inay joojiyaan adeegsiga duqeynta deegaanno dhan oo rayidku degan yahay ee magaalada Muqdisho.
- Waa in la soo baaraa lana anshax mariyaa ama si ku habboon dacwad loogu soo oogaa taliyayaasha millateri ee ka mas'uulka ahaa xadgudubyada ka dhanka ah xeerarka caalamiga ah, oo ay ku jiraan kuwii lahaa amarrada hawlgelinta, xilkey doonaan ha hayeene.
- Waa in la xaqiijiyaa in dhammaan taliyayaasha ciidamada ay leeyihiin tababar ku haboon ee dhawrista xeerarka caalamiga.

## Ku socoto dawladda Mareykanka, Midowga Yurub iyo dalalka xubnaha ka ah, Guddiyada Yurub, kan Afrika iyo Jaamacadda Carabta

- Waa in si rasmi ah loo cambaareeyaa xadgudubyada ka dhanka ah xeerarka caalamiga ah ee bani'aadannimada iyo kan xuquuqda aadanaha ee ay gaysteen dhammaan qaybaha ku lugta leh dagaallada Soomaaliya.
- Waa inay taageeraan dadaallada kor loogu qaadayo isla-xisaabtanka Soomaaliya laguna dhamaynayo inaan la isu raacan xadgudubyada waaweyn ee Soomaaliya ka dhacay, dadaalladaasi oo ay ku jiraan samaynta Guddi madaxbannaan oo dhexdhexaad ah oo soo baara soona diiwaan geliya dembiyadii waaweynaa isla markaana ka soo talo bixiya tallaabooyin dheeri ah oo lagu hagaajinayo isla-xisaabtanka.
- Waa inay si guud iyo si gaar ahba uga dalbadaan dawladda KMG ah, Itoobiyaanka iyo Isbahaysiga (ARS) inay qaadaan tallaabo kasta ee ku haboon si loo joojiyo xadgudubyada waaweyn ee ay gaysanayaan ciidamada ka amar qaata ayna xaqiijiyaan in wax laga qabto oo laga xisaabtamo xadgudub kasta ee dhaca.
- Si gaar ahaaneed waa inay uga dalbadaan Dawladda Federaalka KMG ah inay xaqiijiso in ciidamadeedu joojiyaan xadgudubyada loo gaysanayo dhammaan dadka xabsiyada ku jira.
- Midowga Yurub waxaa laga codsanayaa inay ka waantoobaan cadaadiska ay ku saarayaan hay'adda QM u qaabilsan horumarinta Barnaamijyada ee UNDP inay kaalmo dheeraad ah oo toos ah siiso ciidamada booliiska iyo kuwa kale ee TFG-da ee xadgudubyada gaysta.
- Dawlada Mareykankana waxaa loogu baaqayaa inay soo baarto wararka sheegaya xadgudubyada ay ciidamada Itoobiya gaysteen, waa in la aqoonsadaa cutubyadii sida gaarka ah ugu lugta lahaa ayna xaqiijisaa in cutubyadaasi aysan dawladda Mareykanka ka helin wax kaalmo ama tababar ah, illaa iyo inta ay dawladda Itoobiya qaadayso tallaabooyin wax ku ool ah oo kuwii ka mas'uulka ahaa cadaalada laga hor keenayo, sida uu dhigayo xeerka “Leahy Law” oo mamnuucaya in Maraykanku kaalmo milateri siiyo cutubyada ciidamada dawladaha dibedda ah ee iyagoon waxba loo raacanayn ku xad-gudba xuquuqda aadanaha.

## Ku socoto Qaramada Midoobey

### *Ku Socoto Golaha Ammaanka*

- Waa in la dhisaa guddi madaxbannaan oo xaqiiqo raadin ah oo dhexdhexaad ah si ay u soo baaraan una soo diiwaan geliyaan dimbiyadii waa weynaa ee dhacay isla markaana ka soo tala bixiya wadiiqooyinkii lagu suurtogelin lahaa xisaabtanka.
- Waa inay si rasmi ah loo cambaareeyaa xadgudubyada ka dhanka ah baniaadannimada iyo xuquuqul insaanka ee ay galeen dhammaan dhinacyada isku haya dagaalka Soomaaliya.
- Waa in lagu dhiirrigeliyaa xafiiska QM ee xuquuqda aadanaha inuu ballaariyo awooddiisa si uu u fulin karo hawlaha kormeerka iyo ka soo warbixinta xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya.

### *Ku socoto Xoghayaha Guud ee QM*

- Waa inuu gacan ka gaystaa sidii kor loogu qaadi lahaa isla xisaabtanka looga gudbi lahaa waqtigii ahaa inaan la isu raacan xadgudubyada waaweyn ee ka dhaca Soomaaliya, waana in la sameeyaa Guddi xaqiiqo raadin ah oo madaxbannaan oo dhexdhexaad ah oo soo baara soona diiwaan geliya denbiyadii waaweynaa kana soo talo bixiya wixii tallaabooyin dheeraad ah ee la qaadi lahaa si loo hagaajiyo mas'uuliyadda isla-xisaabtanka.
- Waa inuu taageeraa kordhinta tirada shaqaalaha xafiiska QM ee kormeerka xuquuqda aadanaha waana inay si caam ah uga soo warbixiyaan xadgudubyada xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya.

### *Ku socoto xafiiska QM ee Arrimaha Soomaaliya (UNPOS)*

- Iyadoo la taageerayo dadaalkii nabadeed ee Jabuuti, xafiiska QM u qaabilsan Soomaaliya (UNPOS) waa inuusan qaadin tallaabooyin wax u dhimi kara dhexdhexaadnimada xafiiska, taasi oo muhiim u ah hay'adaha gargaarka ee ka hawlgalaya Soomaaliya.
- Waa inuu xafiisku ka waantoobaa inuu ku cadaadiyo hay'adda QM u qaabilsan horumarinta Barnaamijyada ee UNDP inay kaalmo dheeraad ah oo toos ah siiso ciidamada boliiska iyo kuwa kale ee TFG-da ee xadgudubyada gaysta.

*Ku socota Xafiiska QM ee Horumarinta Barnaamijyada (UNDP)*

- Waa inaysan siinnin wax kaalmo toos ah oo lacageed iyo mid qalabayn ahba saraakiisha ciidanka Boliiska TFG-da ee aan soo qaadanin tababarkii boliisnimo ee ay maalgelisey UNDP-du oo lagu baranayey shaqada boliiska iyo xuquuqda aadanaha.
- Waa inay xaqiijisaa in shaqaalaha TFG-da ee ka qayb qaadanaya barnaamijyada tababarrada ah ee ay UNDP maal geliso inaysan ka mid ahayn dad lagu tuhmayo inay gaysteen xadgudubyo ka dhan ah xuquuqda aadanaha.
- Waa inay hakisaa dhammaan kaalmada lacageed ee tooska ah ee UNDP-du siiso Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed oo loo marsiiyo Mashruuca UNDP-da ee Amniga iyo in Sharcigu Taliyo 'Rule of Law and Security' (RoLS) illaa ugu yaraan laga helayo shuruudaha hoos ku qoran:
    - In la abuuro qaab farsamo ahaan loogu jawaabi karo dawladaha deeqda bixiya ee taageera Mashruuca UNDP-da ee RoLS, marka ay soo baxaan eedeymo la xiriira tacadiyada xuquuqda aadanaha oo ay geysteen ciidanka Boliisku waana in la xaqiijiya in wax laga qaban karo markii ay dhacaan.
    - In shaqada laga joojiyo Taliyaha ciidanka Boliiska Cabdi Qaybdiid, inta ay ka soo baxayso natiijada Baaritaanka guddi dhexdhexaad ah oo madaxbannaan oo si aan cidna ka qarsoonayn u soo bandhiga saraakiishii ciidanka boliiska ee ku lugta lahaa xadgudubyada baahsan ee ka dhanka ah xuquuqda aadanaha.
    - Kormeerayaasha madaxa bannaan waa in galaangal loo siiyaa si caqabad la'aan ah dhamman goobaha dadka lagu xiro.
    - Saraakiisha dawladda KMG ah iyo ciidanka boliiskuba waa inay si waafi ah uga soo jawaabaan dhacdooyinka lagu soo wargeliyo ee la xariira xad gudubyada xuquuqda aadanaha ee lala xiriirinayo inay gaysteen ciidanka boliiska.
    - Waa in la xaqiijiyaa nidaam farsamo ahaan si aan qarsoonayn loogu ogaan karo lacagaha mushahar ahaanta ah ee UNDP-du siiso saraakiisha ciidanka boliiska Soomaaliyeed.

*Ku socoto Xafiiska QM u Qaabilsan Xuquuqda Aadanaha (OHCHR)*

- Waa in la kordhiyaa tirada saraakiisha kormeeraysa si muuqatana uga soo warbixinaysa xadgudubyada xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya, waana inay ku jiraan shaqaale waayo aragnimo u leh badbaadinta carruurta iyo dadka laga badan yahay sidoo kalena waayo aragnimo u leh weerrada iyo xadgudubyada lagula kaco dumarka.
- Waa in la xaqiijiyaa in hawsha hay'adda QM ee Xuquuqul Insaanka (OHCHR) ay ka waddo Soomaaliya ay ku wajahnaadaan kormeerrida iyo ka soo warbixinta nuucyada kala duwan ee xadgudubyada xuquuqda aadanaha. Haddii xitaa hawsha kormeerridu aysan suurto gal ka ahayn gudaha Soomaaliya arrimo dhinaca ammaanka ah darteed, waa inay dadaal adag u gashaa sidii ay dadaalkeeda ula beegsan lahayd diiwaan gelinta waayo aragnimadii iyo wixii ay la soo kulmeen qaxootiga ku nool xeryaha qaxooti ee Kenya, Jabuuti iyo Yemen iyo dadka u barakacay Somaliland.